



Leicestershire  
**Police**  
Protecting our communities

# #LivesNotKnives

## Ma garan kartaa sida loo ogaado qof wata mindi?

Ma taqaanaa yaa u badan in lagu xukumo inuu watay mindi?  
Waa dhalinyarta da'doodu tahay 12-25 – ma noqon karaa saaxiibkaa, wiilkaaga ama walaalkaa?

## Ma taqaanaa sababta?

Inta badan sababtu waa inaysan dareemin amni waxayna sidoo kale noqon kartaa cadaadiska asxaabtooda ama inaysan faham buuxa ka haysan sharcinimada qaadashada mindida.

## Calaamadaha digniinta

- Aragtidooda ku aaddan iskuulka / waxbarashadu miyey is beddeshay?
- Ma leeyihiin saaxiibo cusub oo aanad horey ugu arkin?
- Ma yihiin kuwo ilaaliya iyo/ama qarsoodi ka dhigta boorsadooda iyo/ama dharkooda?
- Miyey si aad ah iskaga difaaceen markii aad wax ka waydiisay inay haystaan?
- Ma diraan / ma helaan farriimo ka badan kuwii hore?
- Ma kacaan oo guriga si kadis ah ma uga baxaan?
- Guriga in badan maka maqanyihiin, gaar ahaan fiidkii iyo habeenkii?
- Ma u muujiyeen aragti wanaagsan kuwa mindiyaha sita, tusaale ahaan ka hadlida isdifaacitaan?
- Ma aragtay wax gurigaaga ka maqan oo loo isticmaali karo hub ahaan sida mindida jikada ama mismis?





Leicestershire  
**Police**  
Protecting our communities

## Waxaan u malaynayaa in qof aan garanayo uu wato mindi. Halkeen wax ka bilaabaa?

- Marka dhalinyarada wax laga baro cawaaqibka dambiyada mindida waxaa laga yaabaa inay dib uga fikiraan qaadashadeeda.
- Isku day inaad dhisto isku-kalsoonidooda oo aad xoojiso muhiimadda noloshooda iyo waxa ay qaban karaan si ay ugu kobciso mustaqbal wanaagsan.
- Waqti ku qaado inaad si dhab ah ula sheekaysato iyaga, halagu helo oo diyaar u ahaw inaad dhagaysato. Xusuusnow inaad u ogolaato codkoodu inuu ahaado kan ugu weyn ee la maqlo inta lagu jiro wadahadalka.

## Tixgeli inaad sheegto:

- **inay ikhtiyaar leeyihiin.** Maaha hal waddo oo keliya, had iyo jeer waxaa jira fursad lagu beddelo waxyaabaha ku xeeran.
- **sharciga.** Waa sharci daro in mindi la qaato, xitaa haduu iska leeyahay qof kale wuxuuna ku mutaysanayaa xukun afar sano ah.
- **booliska.** Way joogsan doonaan oo waxay baari doonaan qof ay rumaysan yihiin inuu sito mindi.
- **badqabka shakhsi ahaaneed.** Mindida loo qaato is ilaalinta waxaa loo adeegsan karaa qofka sita.
- **cawaaqibta.** Dembiga mindida waxaa loo tixgeliyaa inuu yahay dambi waxyeello wuxuuna saameyn weyn ku yeelan karaa awooddooda inay shaqo helaan. Qaadashada ama adeegsiga mindi keliya saameyn kuma yeelanayso shakhsigaas. Marka mindi la isticmaalo, shakhsiga qoyskiisa, dhibbanaha iyo dhibbanaha asxaabtiisa iyo qoyskiisa dhamaantood way saamaynaysaa.

## Waxaan rabaa macluumaad dheeri ah oo ku saabsan dambiga mindida. Halkeen aadi karaa?

Booqo websaytkeena si aad u hesho macluumaad dheeri ah:



[leics.police.uk/KnifeCrime](https://leics.police.uk/KnifeCrime)



Leicestershire Police



@LeicsPolice



leicestershire\_police